IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

الجريـــدة الرسميـــة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16aad Muqdisho, 20ka Feberaayo 1988 L. 1 R 2

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU**: **waa** 5 shilin lambar walba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Carshuurraha ee

FAAFIN RASMI AH L. 1 R 2 ee 20 Feb. 1988.

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 4 ee 17 Jan. 1988, Dib. U Habayn Hu'ga Garsoorid da (Toga) BOG. 108

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 5 ee 20 Jan. 1988, Sheekh Mukhtaar oo laga bed delay Maxkamadda B/da Gobolka Bay » 109

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L.6 ee 12 Jan. 1988, Magacaabid Mootaayo. » 110

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI Lambar 1 Tr. 15 Dis. 1987, Salaanta Qaranka.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Shareiga soo socda:

Qodobka 1aad

Heesta taariikhiga ah ee hordhaceedu yahay «SOOMAALIYEY TOOS, TOOS OO ISKU TIIRSADA, HADBA KIINA TAAGDARAN TAAGEERA ABIDKIINEY», Waxaa loo qaatay inay noqoto «Salaanta Qaranka» ee J.D.Soomaaliya.

Qodobka 2aad

Miraha Heesta iyo muusikadeeda waxay ku cad yihiin lifaaqyada «A» iyo «B» ee Sharcigan.

Qodobka 3aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo 16ka Nofembar 1988, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 15 Dec. 1987

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

## SALAANTA QARANKA

### LIFAAQA «A»

SOOMAALIYEEY TOOS,
TOOS OO ISKU TURSADA,
HADBA KIINA TAAG DARAN,
TAAGEERA ABIDKIINEEY,
IDINKAYSU TAAKHAAYOO,
IDINKAYSU TAAMMAAYEE,
AADANUHU TACLIIN BARAYOO,
WADDANKIISA TAAM YEEL,
ARLIGIINNAA TAAKA AHOO,
SHARCIGAA ISKU KIIN TOLAYOO,
LUQADDAA KU WAAXIDAHOO,
KUMA KALA TEGAYSAAN,
TIRO ADHIYOO DHAXALAA,
SIDDEED LAYDIIN SOO TUBAYOO,
KINBA TOBAN LA MEELMARAYOO,
CADOWGIIN IDIIN TALI,
TULDO GEELOO DHACAN BAAD,
TOGASHO UGU BADHEEDHAANE,
MA DHULKAA DHANEE TEGEY BAAN,
KINNA DHAGAX U TUURAYN,
QARANKAN HUBKIIU TUMAYO,
TOORRAYDA DHAAFAYN,
OON TAAR SAMAYN KARIN,
UURKU TAALLA WEYNAAYEEY,
HADBA WAXAAN LA TAAHAAYOO,
TOGAGGA UGA QAYSHAA,
NIN DALKUSU CADOW TAABOO,
U TOL WAAYEY BAAN AHAYEEY,
HADBA WAXAAN LA OOYAA,
ILMADU IIGU QUBATAA,
IKHTIYAAR NIN LOO DIIDOO,
LA ADDOONSADAAN AHAYEEY,